


Kitaabka Quduuska ah ee Carruursha waalidsha

Billoowga Mans Murugu



May kiin qoray: Edward Hughes

Sawiri: Byron Unger; Lazarus
Alastair Paterson

Wala kii habeeyay: M. Maillot; Tammy S.

May kin turjumey: www.christian-translation.com

Wala soo saray: Bible for Children
www.M1914.org

©2021 Bible for Children, Inc.

Shati: May xaq inlataa ini ada nugul kusameysati ama daabacati
sheekadun ilaa inti ada in gadanah.


1

WALA KASTA ALLAH AYAA
SAMEEYAY! Markuu Eebbe abuuray
ninkii ugu horreeyay, Aadan, wala la
deggenaa Beerta Ceeden xaaskiisa
Xaawa. Wala ahaayeen kuwo sifiican
ugu faraxsan adeecida
ilaahay iyo ku raaxaysiga
joogitaankiisa
ilaa hiraab
uun ...



2

"Ilaah miyuu idinku yidhi in cuntooy geed kasta?" Abeesadii ayaa Xaawa weydiisay. "Waan cuni karnaa midho kasta laakiin mid uun," ayay ku jawaabtay. "Haddii aan cunno ama taabno midhahaas, waan dhiman doonnaa." Abeesadii ayaa si qosol leh u tiri: "Ma dhiman doontid."



3

"Waxaad noqon doontaa sida Ilaah oo kale." Xaawa waxay dooneysay midhaha geedkaas. Waxay dhegeysatay abeesadii wayna cuntay midhihiisii.




4

Ka dib markay Xaawo caasiday Ilaah waxay u horseeday Aadan inuu sidoo kale cuno midhaha. Aadam waxay ahayd inuu yiraahdo, "Maya! Ma caasiyi doono erayga Ilaah."




5

Markii Aadan iyo Xaawo dembaabeen, labadooduba way ogaayeen inay qaawan yihiin. Waxay u tolayeen caleemo berde ah dufan, wayna isqariyeen waxayna ku dhuunteen duurka ilaahay agtiisa.




6

Xilliga qabow ee fiidkii ayaa Ilaah u yimid beerta. Wuxuu oga wixii ay sameeyeen Adam iyo Xaawa. Aadan wuxuu eedeeyey Xaawa. Xaawo ayaa maska dusha ka saartay. Ilaah wuxuu yidhi, abeesadu waa inkaarantahay, naagtuna xanuun bay lahaan doontaa markay carruurto dhalaan. "Adamow, maxaa yeelay waad dembaabtay, dhulkuna wuxuu ku inkaarantahay yahay qodxan iyo yamaarug."




7

Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa ka saaray jardiinadii cajiibka ahayd. Maxaa yeelay, iyagu way dembaabeen, oo waxaa laga soocay Ilaahii noloshu siiyey!




8




Ilaah wuxuu u sameeyay seef ololaysa si ay iyaga u joojiyaan. Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawa u sameeyey jubbado maqaar ah. Xagee buu Eebbe kala baxay hargaha?

9




Waqti ka dib, qoys baa u dhashay Adam iyo Xaawo. Wiilkoodii ugu horreeyay, Qaabiil, wuxuu ahaa nin beerta ka shaqeeya. Wiilkooda labaad, Haabiil, wuxuu ahaa adhijir.

10



Maalin baa Qaabiil Ilaah hadiyad ahaan ugu keenay xoogaa khudrad ah. Haabiil wuxuu hadiyad ahaan u keenay qaar ka mid ah idaha ugu fiican. Ilaah wuu ku farxay hadiyadda Haabiil.

11




Ilaah kuma farxin hadiyadda Qaabiil. Qaabiil aad buu u xanaaqay. Laakiin Eebbe wuxuu yidhi, "Haddaad waxa saxda ah samaysid, miyaan lagaa aqbali doonin?"

12



Qaabiil xanaaqiisii ma uu bixin. Muddo ka dib berrinkii ayuu ku kacay Haabiil oo uu dilay!

13



Ilaah wuxuu la hadlay Qaabiil. "Aaway walaalkaa, Haabiil?" "Ma aqaano," Qaabiil wuu been sheegay. Ma aniga ayaa ilaaliya walaalkay? Ilaah wuxuu ku cigaabay Qaabiil isagoo ka qaaday awooddiisii tacabka beeraha kana dhigay mid warwareega.


14

Qaabiilna Rabbiga hortiiisu ka tegey. Wuxuu guursaday gabar ay dhaleen Adam iyo Xaawa. Qoys bay kiciyeen. Markiiba, Qaabiil awowgiis iyo ayeeyadiis ayaa sii buuxiyay magaaladii uu aasaasay.




15

Dhanka kale, qoyska Aadan iyo Xaawo si dhakhso leh ayey u kaceen. Beryahaas dadku aad bay uga cimri dheeraayeen maanta.



16

Markii wiilkeedii Seth dhashay, Xaawa waxay tidhi, "Ilaah wuxuu i siiyey Set, oo aan ku beddelo Haabiil." Set wuxuu ahaa nin cibaado badan oo noolaa 912 sano wuxuuna dhalay caruur badan.



17


Adduunyada, dadku way sii xumaanayeen markii jiilba jiil kale raacayay. Ugu dambayntii, Ilaah wuxuu go'aansaday inuu baabi'yo aadanaha iyo Dugaagga iyo shimbiraha oo dhan. Eebbe waa ka xumahay



inuu dadka abuuray. Laakiin nin keliya ayaa Eebbe ka farxiyey ...

18

Ninkani wuxuu ahaa Nuux. Farac reer Set ah, Nuux wuxuu ahaa mid xaq ah oo aan eed lahayn. Wuxuu la socday Ilaah. Wuxuu kaloo baray saddexdiisa wiil inay adeecaan Ilaah. Haddaba Ilaah wuxuu qorsheeyey inuu Nuux u adeegsado



si aad u yaab

badan oo gaar ah!

19

Billoowga Mans Murugu

Sheeko ku koyti harafka Illahy kutabshey, quduska eh

May lako heley

Bilowgii 3-6

"Eraygaaga galidiisu wala iftiimisaa." Sabuurka 119:130

20

Dhamati

2



60

21

Doogan Baybalka ahi wala inoo sheegaye wala kisaabsan yaha ilaaheenna ajiibka ahi ina abuuray ee wala fadaay in uu ogaado usu.

Ilaahay wala ogyahay wali unifalnay wali hun, oo ugu weeran, dembi inqaabta dembigu waa dhimasho, laakin ilahay aad kiin jecelyaha wala indiray igarshee shaleedi, ciise, ina kidhimada Iskutallabta oo la inqaabw dembiyadaada. Reed ciise ha noo noolaaday wala indareere iddah jannada! Madi adi faha santa ciise oo aad fadaase hooba kaa dhaafo dambiyadaada, walaagu sameeye fadee! Isaga kooye xalkun isin dhatiinyaa ki noolaadi fade, oo walishiin usu la noolaasan fadee.

Madi adi fahan santa inay taasi run tahay, ilaah insheek: Gacilye ciise, wala aaminsana in adi ileeh atah, oo aad noqote magal in dhimada dembiyadayda, oo hadadna aad mar lamaad noolaata, Fadlan noolashayda hangal oo afi dembiyadayda, si aan noolal jadiid helo hadda, oo maalin uun aan u sii joogo inaan weligay kula joogo. Igu caawi inaan ku adeeco oo aan adiga ugu noolaado sidii canuggaaga. Aamiin

Akhri kitaabka quduuska ah oo lahal hiraab kasta illah!
Yooxanaa 3:16

22